## Xeerarka & Siyaasadaha Beerta Bulshada ee Magaalada Hopkins

Beeraha bulshada ee Magaalada Hopkins waa barnaamij iskaa wax u qabso ah oo aan la kormeerin. Fadlan naga caawi inaad u hoggaansanto xeerarkan soo socda:

- Waa in marin lagu ilaaliyaa hareeraha goob kasta oo beer ah. Lama oggola in dhir ama wax kale ay ku fidaan marinnada ama goobaha deriska ah.
- Qoys walba waxaa loo oggol yahay hal goob beer ah oo keliya.
- Biyaha wadajir ayaa loo isticmaalaa; tuubooyin lama oggola, balse baaldiyo waa la isticmaali karaa. Tuubo kasta oo aan lala joogin waa la qaadi doonaa waana la tuuri doonaa.
- Tiirar lagu calaamadiyo geesaha goobtaada, kuna qoran magacaaga iyo lambarka goobta, waa in looga tagaah xilliga oo dhan.
- Beerista xashiishadda (cannabis/ marijuana) goobaha beerta bulshada waa mamnuuc sida ay dhigtay Magaalada. Qof kasta oo jebiya xeerkan waa laga saari doonaa goobtiisa.
- Beeraleydu iyaga ayaa mas’uul ka ah keenista qalabkooda. Meel kaydin ah lama bixiyo.
- Fadlan haramaha (weeds) yaree inta suurtagalka ah.
- Goob kasta oo aan la beerin ka hor **Juun 5, 2026** waa la qaadi doonaa dibna waa loo iibin doonaa. Lacag celin ma jirto.
- Qof kasta oo aan daryeelin goobtiisa wuxuu halis ugu jiraa inuu waayo xuquuqda beerashada sannadkaas.
- Tubaako, daroogo sharci-darro ah, ama cabitaan khamri ah laguma oggola beeraha bulshada ee Hopkins
- Magaalada Hopkins waxay xaq u leedahay inay mar walba si buuxda u gasho dhammaan goobaha beeraha si loo hubiyo in dhammaan xeerarka, nidaamyada, iyo sharciyada la raacayo. Haddii loo baahdo, Magaalada waxay joojin kartaa heshiiska kirada goobta beerta si loo ilaaliyo badbaadada iyo danta guud ee hantida.

Dhammaadka Xilliga

- Dhammaan dalagyada waa in la goostaa. Dhammaan agabka aan dhirta ahayn (sida tiirar, xayndaabyo, qalab taageero, xarig, calaamadaha safafka, marooyinka dhulka lagu daboolo, iwm.) waa in laga saaraa ugu dambayn **Oktoobar 15, 2026**. Dhammaadka xilli kasta oo beerasho ah, **Magaaladu waxay qodi doontaa dhulka**.
- Wax kasta oo goobta ku haray ka dib **Oktoobar 15, 2026** waa laga Qaadi doonaa (lama soo celin doono). Waqtiga shaqaalaha, kharashka qashinka, iyo kharash kasta oo kale oo la xiriira nadiifinta agabka haray waxaa lagu dallaci doonaa kiraystaha goobta sida ku habboon.
- Beeraleyda ku guul-darreysta inay si habboon u nadiifiyaan goobtooda dhammaadka xilliga looma oggolaan doono inay mustaqbalka helaan goob beer ah.